# Adeegga Guddi Maxkamad Gudaha Maine: Xuquuqdaada - Waajibaadkaaga

**GARSOORAHA GUUD SAUFLEY**: Ku soo dhawaada Adeegga Guddida Maxkamadda ee gudaha Maxkamadda Gobolka Maine. Aniga oo ku hadlaya magaca dadka Gobolka Maine, waxan idiinka mahadcelinayaa wakhtigiina iyo sida ad raali uga tihiin inad adeegtaan.

Adeegga Guddi Maxkamad waa qayb muhiim ah oo ka tirsan hiddaheena – ah dawlad ay dadku leeyihiin, oo ay dadku sameystan, oo loo sameeyay dadka. Waa mid ka mid ah kuwa ugu muhiimsan xuquuqdeena u ilaaliyo Dastuurka Maraykanka iyo Dastuurka Maine. Waa xeer leh awood badan, isla markaana fudud. Dadka lagu soo dacweeyay dambi ama ku jira muran gaar ah waxay xaq u leeyihiin inay facooda weydiistaan inay go'aamiyaan xaqiiqooyinka kiiskooda.

Xubnaha guddi ee ka adeegay maxkamad-saaris leh guddi waxay si joogto noogu sheegaan in markii hore u shaki kaga jiray inay qaban karaan waajibaadka, laakiin markii dambe ay ku faraxsanaayeen oo ku faanayeen inay guteen waajibaadkaas.

Iyaga, iyo idinka waxan u celinayaa mahad gaar ah. Waxa kale oo an u mahadcelinayaa loo-shaqeeyeyaasha shaqaalahooda ku dhiirigaliya inay adeegaan marka loo yeedho. Waxad gargaar ka geysataan in maxkamadaheenu u shaqeeyaan si hufan, in la yareeyo daahidda, iyo in la sugo in guddiyadu si dhab ah u metelayaan qaybaha kala duwan ee beelahooda. Waad mahadsantihiin.

**BILL GREEN**: Maalin wanaagsan, waxan ahay Bill Green.

**DIANE ATWOOD**: Anna waxan ahay Diane Atwood. Waxanu halkan u joognaa inan idinka caawino inad fahamtaan waxa la filayo maanta iyo inad wax ka barataan adeegga guddi maxkamad ee ka jira Maine.

**BILL GREEN**: Sida u Garsooraha Guud Saufley yidhi, ka qaybgalka guddi waa waajibaad muhiim ah oo saaran muwaadinka oo gargaar ka geysta in la ilaaliyo xuquuqdeena iyo fursadaheena; hase yeeshee, bilaw ahaan waxa laga yaabaa inad is weydiinaysaan sida annu ku helnay magacaaga?

**DIANE ATWOOD**: Haddaba Bill, waxay arrintu ka bilaabantaa marka Xafiiska Gaadiidka Matoorka Leh (Bureau of Motor Vehicles) u Maxkamad Sare oo kasta oo ku taalla 16 degmo ee Maine u soo diro liiska wadeyaasha baabuur ee Maine iyo haysteyaasha Aqoonsiga Maine ee degan degmo kasta.

Taas ayaa si nasiiba waxa looga doortaa magacyo iyada oo la adeegsanayo kombiyuutar. Haddaba waa **idinka** dadka maanta loo yeedhay inay yimaadaan. Shuruudaha kaliya ee ka qaybgalka guddida waa inad tahay 18 jir ama ka weyn tahay, oo ad tahay muwaadin Maraykan oo akhriyi kara, ku hadli kara, oo fahmi kara Ingiriisiga (iyada oo awood la'aanta ku hadlidda Ingiriisiga ay ku saleysan tahay naafo mooyaane). Waxa kale oo la rabaa inad degan tahay Degmada ad ka adeegaysid xubin guddi ahaan.

WAA TIXRAAC KALIYA

**BILL GREEN**: Waxad moodaa in ku dhawaad qof kasta u noqon kara xubin guddi maxkamad, taasi waa sax. Kuwa hor yimaada maxkamadahan waxay xaq u leeyihiin dacwad-qaadis leh guddi maxkamad oo ka kooban facooda, oo ah dadka aynu la shaqeyno ee ku nool beelaheena. Waa guddi ka kooban dad idinka oo kale ah.

**DIANE ATWOOD**: Waxa kale oo laga yaabaa inad is weydiinaysaan muddo intee leeg ayaad noqon doontaan xubno guddi? Iyo inta maalmood ee dhabtii ad adeegi doontaan? Jawaabtu waxa weeye adeegga guddi maxkamad wuxu caadi ahaan ku kooban yahay 15 maalmood, laakiin qasab ma ah inay isku xigaan maalmahaasi. Waxa laga yaabaa inad ka qaybgashaan in ka badan hal guddi muddo ah dhawr todobaad. Qaar idinka mid ah waxa laga yaabaa in aanay kaba qaybgalin wax ah guddi maxkamad. Hase yeeshee, joogitaankiinu waa muhiim waana la idinka mahadcelinayaa.

**BILL GREEN**: Maxkamaddu waxay jadwalka galin doontaa dacwad-qaadisyo badan dhawrka todobaad ee soo socda. Laakiin hufnaan daraadeed, maxkamaddu waxay isku daydaa inay isku mar guddiyo u dooratoo dhammaan kiisaska. Tani waxay kooxda guddida ka ilaalisaa inay soo noqdaan marrar badan. Xubnaha guddi ee aan la soo xulan waxa maqnaashahooda raali laga noqon dhawr maalmood. Kahor inta aanad bixin waxa lagu siin doonaa fariimo ku saabsan goorta ad ku soo noqonaysid maxkamadda. Fariimahaas waxa ka mid noqon kara inad wacdid telefoonka macluumaadka guddi maxkamad. Karaaniga ayaa kuu sheegi doona lambarka la wacayo.

**DIANE ATWOOD**: Dad badan ayaa ka walaaca in aanay qaban doonin shaqo fiican ama aanay garanayn wixii ay sameyn lahaayeen xubin guddi ahaan. Kuwaasi waa walaacyo caam ah, laakiin fadlan la walwalin. Nidaamka guddii maxkamad waa mid si fiican ugu soo shaqeeyay dad idinka oo kale ah illaa xilliyadii isticmaarka. Wixii ah walaacyo ee aan lagaga jawaabin fiidiyowgan, ama buuggan yar, waxad kala hadli doonaa Garsooraha ama karaaniga. Hadda, bal an fiirinayo waxa dhaca inta lagu jiro xulashada guddi maxkamad.

__Xubin Guddi 1__ – "Inta bilawga lagu jiro, waxad ka walwalaysaa shaqada oo ad ka baaqatid. Xooogaa kadib, walwalkaasi wuu iska tagaa sababta oo ah waxad fahmaysaa sida tani muhiim u tahay."

__Xubin Guddi 2__ – "Waxan rajeynayaa inan awoodi doono inan tago ballantayda dhakhtarka maalinta Salaasada, waxan is weydiinayaa sidan taas uga hadli karo?"

__Xubin Guddi 3__ – "Waligay ma galin qol maxkamad. Waxa kaliya ee tan ka aqaanay waa meesha ay ku taallo maxkamaddu. Waxa jooga dad ka badan intii an filayay."

WAA TIXRAAC KALIYA

**ASKARIGA MAXKAMADDA** –Waad ku mahadsan tihiin imaanshaha, waan arkaa in qof kasta yimid. Dhawr daqiiqadood kadib waxaynu gali doonaa qolka maxkamadda, laakiin ka hor, waxan rabaa inan taabto laba qodob.

Marka ugu horeysa, haddii ad leedahay ballan caafimaad ama ballan kale oo aan la xidhiidhin shaqada oo ad rabtid inad tagtid labada todobaad ee soo socda, fadlan la hadal karaaniga.

Marka labaad, waxa laga yaabaa inad aragtay in lagu siiyay lambar xubin guddi oo ku qoran kaadhka ad maantay keentay (weynee). Inta lagu jiro muddada adeeggaaga, waxay maxkamaddu kuugu yeedhi doontaa lambarkaaga, balse kuugu yeedhi mayso magacaaga. Waxa annu tan u sameynaa si loo ilaaliyo asturnaantaada. Haddii ad rabtid inad is bartid xubnaha guddida ee kale, taasi waa la oggol yahay, adiga ayaana ikhtiyaarka iska leh.

Hadda, i soo raaca.

**Xeer-beege 4** – "Ma fiigsani, laakiin su'aalo ayaan is weydiinayaa. Waxan u meleynayaa inay noqon doonto arrin xiiso leh."

**DIANE ATWOOD**: (Xubnaha guddidu waxay raacayaan askariga maxkamadda oo intay qolka kulanka ka baxaan ayay tagaayaan qolka maxkamadda) Haddii ad u baahatid fasax sababta oo ah xaalad caafimaad, ama, haddii ad u baahan tahay gargaar ah maqalka, fadlan u tag karaaniga ama askariga maxkamadda. Haddii ad u baahan tahay in lagaa gargaaro maqalka, dhammaan maxkamadduhu waxay leeyihiin qalab dhegaysi waxana loo isticmaali karaa si fudud.

**BILL GREEN:** Waxa jira wakhti badan oo aan shaqo socon inta lagu jiro waajibaadka guddi maxkamad, laakiin waxannu kuu sheegaynayaa in Garsoorayaashu iyo karaaniyadu ay si firfircoon u shaqeynayaan adiga oo aan arkayn. Fadlan ka warqab in teleefonada gacanta aan loo oggolayn qolka maxkamadda.

**ASKARIGA MAXKAMADDA** – DHAMMAAN SARE KACA

**BILL GREEN:** Waxay u badan tahay inad hore u ula kulantay askarta maxkamadda. Waxay ilaaliyaan nidaamka maxkamadda marka wakhtigu sii socdana waxad arki doontaa siday u leeyihiin gargaar iyo aqoon. Waxay ka jawaabi karaan ama jawaab u heli karaan dhammaan su'aalahaaga aan sharci ku saabsanayn. Waxana ay u shaqeyeen si adag si ay joogitaankaaga uga dhigaan mid fiican intii suurtogal ah.

**MAXKAMADDA:** Subax Wanaagsan, waad ku mahadsan tihiin wakhtiga ad halkan ku timaadeen. Waxan ahay Garsoore Lance Walker, oo ka tirsan Maxkamadda Sare ee Maine.

WAA TIXRAAC KALIYA

Mar dhow, waxan karaaniga weydiisan doonaa inu idin dhaariyo. Waxad ku dhaaran doontaan, ama xaqiijin doontaan, inad si run ah ugu jawaabtaan tiro su'aalo ah oo la idin weydiin doono. Tani waxay noqon doontaa bilawga hawsha xulashada guddida maxkamadda. Waxa annu habka su'aalo weydiinta xubnaha guddida ugu yeedhnaa erey Faransiis ah oo ah "voire dire." Aniga oo isticmaalaya habka "voire dire" waxan dhammaantiin idin weydiin doonaa taxane su'aalo ah oo ku saabsan waxa ad ka taqaanid, wax kasta ha ahaato, kiiska gaarka ah iyo dadka ku lug leh.

Tusaale ahaan, haddii dacweeyaha soo oogay kiis dhaawac shakhsi u sheeganayo in la-dacweeyuhu sababay murkacasho qoor, waxay maxkamaddu rabi doontaa haddii mar uun u ku soo maray dhaawac la mid ah. Haddii su'aasho ku khuseyso, xiitaa sida ugu yar, ii muuji inta ad sare joogsato.

Marmarka qaarkood, waxan u baahan karaa inan ku weydiiyo su'aalo xasaasi ah. Haddii taasi dhacdo, waxay u badan tahay in su'aalaha meel gooni ah lagugu weydiin doono, ama lagugu weydiinayo goob dhinaceed. Marmarka qaarkood waa lagu weydiisan doonaa inad buuxisid xaashi su'aalo-weydiin. Fadlan u hubso inad lambarkaaga guddi maxkamad ku qortid xaashidaada su'aalo-weydiinta ee ad buuxisay.

Waa inad ka jawaabtid kaliya su'aalaha lagu weydiiyo. Ha ku dhawaaqin wax isbeddel ku sameyn kara ra'yiga kooxda guddida maxkamadda inteeda kale. Kaliya sare joogto oo i sug inan kula hadlo.

Mudane Karaani, dhaari xubnaha guddida.

**DIANE ATWOOD**: Marka laga reebo dhaarinta xubnaha guddida iyo markhaatiyada, waxa u karaanigu qabtaa doorar badan oo u ku taageerayo maxkamadda, oo ay ku jiraan faylasha oo u daryeelo, waraaqaha oo u buuxiyo, iyo marag-kacyada oo u qaado. Dheeri ahaan, karaaniga waxa u kuu yahay il muhiim ah haddii ad qabtid su'aalo muddada ad gudanaysid adeegga xubin guddi ahaan. Sidoo kale, haddii ad uga baahan tahay maxkamadda warqad ad kaga cudur-daatid shaqadaada sababta oo ah adeeg xubin guddi maxkamad, fadlan u tag karaaniga.

**BILL GREEN**: Qof kale ayaa oo ad ku arki doontid maxkamadda waa qoraaga maxkamadda. Qoraaga maxkamaddu waxa u qori doonaa dhammaan hawlgallada kiis kasta. Qoraalkan ayaa dib loo fiirin karaa haddii su'aali ka taagan tahay marag-kac. Haddii qoraaga maxkamaddu aanuu joogin, codka laga duubay hawlgalka ayaa qoraal looga dhigi doonaa hab ah dhigital.

**DIANE ATWOOD**: Qof kale oo laga yaabo inad Maxkamadda Maine ku aragtid waa turjubaanka. Marka loo baahdo, turjubaano ayaa jooga qolka maxkamadda si ay u gargaaraan dadka aan ku hadlin Ingiriisiga. Turjubaanada xirfadleyaal ah

WAA TIXRAAC KALIYA

waxay gargaar ka geystaan in la sugo in qofku fahmo macluumaadka lagu soo bandhigo maxkamadda.

**MAXKAMADDA**: Kiiska maanta ina hor yaalla, waxa u dacweeyuhu ku dacwoonaya in la siiyo magdhow sababta oo ah dhaawacyo ka soo gaadhay sida u sheegayo shil baabuur. Ma jiraan xubno guddi oo mar uun ku dhaawacmay shil baabuur? Haddii ay haa tahay, fadlan sare joogso. Lambarkaaga, fadlan?

**XUBIN GUDDI LAM. 134**: Xubin guddi lambar 134.

**MAXKAMADDA**: Marna abidkkaa ma kugu dhacay shil baabuur, Xubin guddi 134?

**XUBIN GUDDI LAM. 134**: Haa, Mudane.

**MAXKAMADDA**: Oo ma ku dhaawacantay?

**XUBIN GUDDI LAM. 134**: Haa, Mudane.

**MAXKAMADDA**: Ma ka bogsatay dhaawacyadaadii?

**XUBIN GUDDI LAM. 134**: Haa, waan ka bogsaday.

**MAXKAMADDA**: Ma u maleynaysaa in waayaha ad la soo kulantay ee la xidhiidha shilka u si uun u saameyn doono awooddaada ad si cadaalad ah oo aan eexasho lahayn ku dhegaysan lahayd xaqiiqooyinka kiiskan?

**XUBIN GUDDI LAM. 134**: Maya, Mudane, u maleyn maayo.

**MAXKAMADDA**: Mahadsanid. Fadlan fadhiiso.

**DIANE ATWOOD**: Sababta su'aalahan ma aha in qof laga khajiliyo, laakiin waxa weeye in la helo guddi aan eexasho lahayn si dadka lug ku leh murankan u helaan go'aan cadaalad ah. Haddii guddiyo loo xulanayo laba kiis oo isku eg ama isku dhow, waxa laga yaabaa in Garsooruhu isla su'aalahaas ku weydiiyo laba jeer. Haddii mid ka mid ah su'aalahaas ku khuseyso, waa muhiim inad sare joogsatid markale oo ad sugtid in su'aalo lagu weydiiyo. Sida ad arki doontid waxa guddida dhabta ah si nasiib ah looga soo dooran doonaa xubnaha guddida ee aan laga saarin sababta oo ah dhinac u janjeedh ama dhinac-u-hiilin suurtogal ah ama khilaaf daneed.

**MAXKAMADDA**: Mudane Karaani, fadlan soo door guddida kiiskan.

**BILL GREEN**: Kadib nidaamka "voir dire" ama su'aalo-weydinta, waxa u karaaniga magacyada xubnaha guddida ka dooran doonaa sanduuqa. Kadib habka doorashada, waxay dhinacyadu tagi doonaan goob dhinaceed waxana u dhinac kasta fursad u leeyahay inu tiro go'an ka saaro xubnaha guddida, illaa guddida kama-dambeysta ah la doorto. Caadi ahaan dacwad-qaadistu waxay bilaabmi

WAA TIXRAAC KALIYA

doontaa kadib dhawr maalmood ama todobaad. Hase yeeshe, waxa laga yaabaa inay dhakhso u bilaabanto kadib marka la doorto xubnaha guddida.

**DIANE ATWOOD**: Ma jiraan wax loogu yeedhi karo dacwad-qaadis ah tusaale? Waxay u badan tahay maya. Laakiin dacwad-qaadista kasta waxay kuwa kale la wadaagtaa waxyaabo. Kow, guddi ayaa la doortaa. Qareennada ama looyaradu waxay caadi ahaan bixiyaan hadallo furitaan, kadibna waxa la soo bandhigaa marag. Dhinac kasta wuxu soo koobaa kiiska inta lagu jiro hadallada xidhitaanka. Xaakiin ayaa dacwad-qaadista ku toosiya jadwalka oo go’aamiya marag-kaca la aqbali baro. Waxa kale oo u Garsooruhu fariimo siiyaa guddida, kaasoo kadib tashada illaa go’aan laga soo saaro.

**BILL GREEN**: Aad bay arrimuhu uga duwan yihiin aflaamta ama waxa laga daawado telefishanka. Kuwani waa dad dhab ah oo ku hor imanaya si loo dhegaysto kiisaskooda dhab ah. Waxad dhakhso u fahmi doontaa in dacwad-qaadista tahay arrin bini’aadan ku jiro. Sharcigu wuxu ku nool yahay oo ku neefsadaa halkan qolka maxkamadda. Waxad isticmaali doontaa garaadkaaga iyo waayahaaga si ad u go’aamisid cidda sheegaysa runta, cidda sax ah ama cidda khaldan.

**DIANE ATWOOD:** Marka dacwad-qaadistu bilaabanto, waxay qareennadu bixin doonaan hadal bilaabis. Qof ka tirsan shaqaalaha Xeer-ilaaliyaha Degmada ama Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ayaa horseedaya dambi ku oogista. Caadi ahaan waxa jiri doona hal ama laba qareen oo wakiil ka ah la-dacweeyaha, laakiin marmarka qaarkood dadku waxay doortaan inay naftooda u doodaan. Waxad maqli doontaa ra’yigooda ku saabsan waxa kiisku yahay iyo waxay ku talogaleen inay soo bandhigaan. Maraggu wuxu ku xigaa hadallada furitaanka. Kani guud ahaan wuxu ka kooban yahay marag-kaca dhawr markhaati iyo noocyo kala duwan oo ah dukumentiyo iyo marag maadi ah.

**BILL GREEN**: Inta lagu jiro kiiska, waxa laga yaabaa in isla oggolaansho arrin (stipulations) la sameeyo. Isla oggolaanshuhu waa heshiisyo ay gaadhaan qareennadu oo ku saabsan in xaqiiq ama hadal gaar ah u dhab yahay. Garsooraha ayaa idin siin doona fariimo dheeraad ah oo ku saabsan waxa ah marag ama aan ahayn marag wakhtiga dacwad-qaadista.

**DIANE ATWOOD:** Sidoo kale, inta lagu jiro dacwad-qaadista, waxa laga yaabaa in Garsooraha iyo qareennadu ay yeeshaan kulan doceed ama in Garsooraha shir lala qaato kaasoo aanay maqlayn kuwa ku jira qolka maxkamadda. Ma aha inad maleysid waxa laga wada hadlayo, waxa laga yaabaa inay kaliya ka wada hadlanaan arrimo jadwal-galin ama xalinayaan su’aalo ku saabsan waxa u yahay marag sax ah.

WAATIXRAACKALIYA

**<u>BILL GREEN:</u>** Kadib marka dhammaan maragga la soo bandhigo, waxay qareennadu sameeyaan hadalladooda xidhitaanka. Halkan waxay ku soo koobi doonaan maragga waxana ay kuu soo bandhigi doonaan waxa u go'aankiinu noqon doono.

**<u>DIANE ATWOOD</u>**: Kadib hadallada xidhitaanka, waxa u Garsooruhu u guddida siin doonaa fariimo ku saabsan waxa u sharcigu yahay marka la fiiriyo kiiskan gaarka ah. Marka ad u dhaqaaqdaan qolka guddida si ad u tashataan, waxa ad haysan doontaan dhammaan wixii ah qodobo sharci ee ad u baahan tihiin. Qodobadaas, maragga ad aragtay ee ad maqashay, iyo garaadka caadiga ah ayaa idinku hagi doona go'aankiina.

**<u>BILL GREEN</u>**: Guddiyadu waxay maqlaan laba nooco oo ah kiisas. Marka u jiro kiis xeer ciqaab, waxay Dawladdu hal qof ama ka badan ku dacweysaa inay galeen dambi. Laba iyo toban qof iyo hal ama laba dheeraad ah ayaa laga dhigaa guddida. Waa in Dawladdu si dhaafsan shaki caqli-gal ah u xaqiijiso dambi-gal waana in go'aanka guddidu yahay mid loo dhan yahay.

**<u>DIANE ATWOOD</u>**: Waxa kale oo ad ka qaybgali kartaa guddi u fadhida dacwad-qaadis *madani* ah oo go'aaminaysa muran ka dhexeeya laba qof ama dad ka badan ama ganacsiyo. Tusaale ahaan kiisaska noocyadan ah waxa ka mid noqon kara murannada heshiisyo, dhaawacyo shakhsi, iyo sheegashooyin farsamo-xumo dhakhtar. Marka u jiro kiis madani ah, qofka keensanaya sheegashada, oo la yidhaahdo dacweeye, guud ahaan waa inu xaqiijiyo kiiskiisa ama kiiskeeda isaga oo soo bandhigaya marag xoogan. Sagaal xubin guddi iyo tiro ah beddelaadyo ayaa maqlaya xaqiiqooyinka kiiska. Ugu yaraan waa in lix ka mid ah sagaalka xubin guddi ay gunaanad ku heshiiyaan ka hor inta aan go'aanka la aqbalin.

**<u>BILL GREEN</u>**: Si loo sugo in go'aanka ad gaadhaan yahay mid cadaalad ah, waxa jira waxyaabo aanad sameyn karin inta ad ka tirsan guddi. Inta lagu jiro adeeggaaga guddi waa in aanad wax ku saabsan kiiska kala hadlin mid ka mid ah qareennada, markhaatiyada, qoreyaasha, ama cid kale. Xiitaa kiiska ha kala hadlin xubnaha kale ee guddida illaa ad ka bilaabataan wada-tashida. Haddii dacwad-qaadistu socoto wax ka badan hal maalin, kiiska ha kala hadlin qoyska ama saaxiibo.

**<u>DIANE ATWOOD</u>**: Marmarka qaarkood, isla kadib marka kiisku dhammaado wariye ama xiitaa qareen ku jiray kiiska ayaa ku weydiin kara su'aalo ku saabsan sababta u go'aanku sidaas u noqday. Adiga ayaa ikhtiyaar u leh inad la hadashid iyo in kale. Haddii aanad rabin, qasab ama ah inad la hadashid.

**<u>BILL GREEN</u>**: Waxa kale oo muhiim ah in aanad iskaa kiiska ugu sameyn baadhis. Bal ka soo qaad waxa dhacay shil baabuur oo leh dhaawacyo kaasoo ka dhacay magaaladaada. Waxa laga yaabaa inad is tidhaahdo bal adigu soo eeg

WAA TIXRAAC KALIYA

goobta si ad u aragtid inad fahmi kartid wixii dhacay iyo cidda ay tahay in la rumeysto ama waxa lagaa yaabaa inay ku soo jiidato inad ka baadhid internetka. Fadlan tan ha sameyn. Waa inad kiiska ku go'aamisid kaliya maragga lagu soo bandhigay qolka maxkamadda.

**DIANE ATWOOD**: Kadib marka ad dhammeystirtid adeeggaaga guddi maxkamad lagaama rabi doono inad markale adeegtid mudo ah shan sanno. Kombiyuutar yaalla Xafiiska Baabuurta Matoor Leh ayaa magacyada u doorta si nasiib ah. Haddii magacaagu soo baxo markale guddaha shan sanno, waad adeegi kartaa haddii ad rabtid. Haddii aanad rabin, fadlan u soo sheeg maxkamadda.

**BILL GREEN**: Ugu dambeyn, wuxu gobolku xubnaha guddida siiyaa lacag yar. Jeegaga waxa caadi ayaan la soo diraa dhawr todobaad kadib adeeggaaga. La soco dakhligaaga cashuurta daraadeed sababta oo ah gobolku ma soo diyaariyo waraaqaha W-2. Lacagta lagu siinayo ma badna. Looguma talogalin inay badnaato. Tani ma aha shaqo; waa waajibaad, waa wax ad u qabanaysid muwaadiniinta kale, gobolka iyo ugu dambeyn, naftaada. Taasi ma ah mid ad lacag ku qiimeyn kartid.

**MAXKAMADDA**: Waad ku mahadsan tahay inad timaadeen maanta. Xusuusta waxa annu u baahan nahay xul balaadhan oo ah dad noqda xubin guddi maxkamad. Waxa annu u baahan nahay dad ka tirsan dhammaan qaybaha nolosha. Boqolaal, dhabtii kumanaan xubno guddi oo idinka soo horeeyay ayaa qabtay shaqo fiican. Waxana annu ku kalsoon nahay inad idinku si mid la mid ah qaban doontaan.

Xubno guddi oo badan ayaa kadib marka ay dhammeeyaan adeeggooda noo sheega inay waayaha ay kala kulmeen u arkaan inu yahay mid ka mid ah kuwo ugu fiicnaa ee ugu xiiso badnaa noloshooda muwaadin. Waxa annu rajeynaynaa inad adinkuna adeeggiina sidaas uga heshaan. Wada-jir ayaynu ku qaban doonaa waxaynu halkan u joogno. Taasina waa in dhammaan dadka ina hor yimaada la siiyo cadaalad loo siman yahay oo aan lahayn eexasho.

Waad mahadsan tihiin. Waxa annu sugaynaa in annu idinla shaqeyno inta lagu jiro wakhtiga ad halkan nala joogtaan.

WAA TIXRAAC KALIYA